# Hel Caawimaad Ah Bixinta Lacagta isbitaalka

Sharciga Colorado wuxuu u baahan yahay isbitaalada inay qiimo dhimis ku sameeyaan daryeelka caafimaadka isbitaalka ama qolka gurmadka degdegga ah ee bukaanada u qalma. Dad badan ayaa la yaabay markii ay maqleen in ay xaq u leeyihiin qiimo dhimis ku timaada lacagaha daryeelka caafimaadka.

Waxaa laguugu baari karaa si loo ogaado inaad xaq u leedahay caymiska caafimaadka sida Medicaid ama haddii aad xaq u leedahay in laguugu kaalmeeyo bixinta lacagta isbitaalka qiimo dhimis. Uma baahnid inaad noqoto muwaadin Mareykan ah ama aad haysato lambarka amaanka bulshada si aad u hesho kaalmada.

- **Bukaanka aan caymiska laheyn: *si toos ah* ayaa loo baari doonaa.**
- **Bukaanka caymiska lleh: waa in uu codsadaa in lagu baaro, *si toos ah uma dhacayso*.**

### SIDA LOO CODSADO BAARITAANKA:

- Wac adeegyada dhaqaalaha ee isbitaalkaada. Magaca CHC iyo/ama 000-000-000
- **TALO MUHIIM AH!** Isbitaalku waa inuu kugu caawiyaa luuqadaada. Haddii aad dooneysid in aad turjuntid waxaad oran kartaa:

  -"Waxaan rabaa turjubaan xirfadle ah oo si fiican u yaqaan (*luqadaada*)"
- Kadib waxaad dhahdaa: "Waxaan rabaa in la ii baaro caymiska caafimaadka dadweynaha iyo xaq u lahaanshaha daryeelka qiimo dhimista ee isbitaalka."
  - Su'aalo dhowr ah ayaa lagaa weydiin doonaa adiga iyo dadka aad la nooshahay.
  - Isbitaalku waa inuu ku baaro 45 maalmood gudahood.

### BAARITAANKA KA DIB:

- Isbitaalku wuxuu kuu sheegayaa barnaamijyada aad codsan karto iyo sida aad u codsan karto.
- **TALO MUHIIM AH!** Haddii aadan xaq u laheyn daryeelka isbitaalka ee qiima dhimista leh, weydii isbitaalkaada sida uu qabo daryeelkaas— waxaa suurtagal ah in aad weli xaq u leedahay kaalmo dhaqaale.

**Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa cohealth.co/hospitaldiscounts**

---

**Cawimaad u baahan? Waxaan halkaan u joognaa inaan taageerno:**

Magaca Ururka, Qofka, Darajada, Iwm...
000-000-0000
Imaylka

*la cusbooneysiiyay 05/2024*